



# Haddii aad qaadato kaalmada shaqola'aanta ama kaalmada hoyga ee guud (yleinen asumistuki), waxaa dhici karta in sannadka 2024 la dhimo kaalmadaasi oo ay ka yaraato intii hore

Baarlamaanku waxaa ay go'aan ku gaareen in la dhimo kaalmada hoyga ee guud iyo kaalmada shaqola'aanta. Halkan ka akhri sida ay kaalmada lagu siiyo isu beddeleyso sannadka 2024-ka.

**1** Qaddarka **Kaalmada hoyga ee guud (yleinen asumistuki)** waa laga dhimay dhammaanba dadka qaata kaalmada hoyga

Inta ugu badan ee dhimista kaalmada hoyga ee guud waxaa ay dhaqangeli doontaa 1.4.2024. Dadka aad isku dheriga tihiin ama aad guriga ku wada nooshihiin waxaa ay xaaladdaan saamaynaysaa, marka isbeddelka dhimista qaddarka kaalmada hoyga ee guud uu dhaqangalo.

Haddii ey tahey markii ugu horeyso ee kaalmada guriga li idin siinaayo, kaalmadaas wuu yaraanaayaa intii ka bilaawato 1.4.2024.

Kaalmada guriga hadii li idin ogolaadey 1.4.2024 ko hor oo aad horey u helijirteen, kaalmadaas waxaa la yareenaayaa marka dambey aad dhalbaneysiin lacagta.

Intaas waxaa dheer in guryaha ay iska leeyihiin dadku (omistusasunto) aan laga bixinaynin kaalmada guriga ee kaalmada hoyga ee guud (yleinen asumistuki) laga bilaabo 1.1.2025.

Ma waxaad ku nooshahay Helsinki? Magaalada Helsinki qaddarka ugu badan ee kharashka guriga ee lagu xisaabtamayo waa uu ka yaraanayaa intii hore, waxaana arrinkaas uu saamayn ku yeelan karaa qaddarka kaalmada hoyga ee lagu siiyo.

Isbeddelkaan ma khuseeyo kaalmada hoyga ee la siiyo dadka qaata lacagta hawl wabka.

Aaladda wax lagu xisaabiyo (laskuri) ayaad ka ogaan kartaa ama ku qiimayn kartaa kaalmada hoyga ee guud, iyo sida uu isbeddelkaan saamaynta ugu leeyahay qaddarka kaalmada hoyga ee lagu siiyo.

**2 Kaalmada shaqola'aanta (työttömyystuki)** waxaa ku dhici doona isbeddelo dhowr ah laga bilaabo 1.4.2024. Waxaa kaalmada shaqola'aanta laga reebayaa ama laga saarayaa lacagta kororka ee qofka carruurta leh (lapsikorotus) iyo qaybta lacagta ee loo yaqaan (suojaosa), kuwaasoo ahaa 300 oo yuuro bishii.

Haddii aad hore u qaadan jirtay lacagta kororka (lapsikorotus) ee la siiyo qofka carruurta leh ee qaata kaalmada shaqola'aanta, kaalmada lagu siiyo waa ay ka yaraanaysaa intii hore 1.4.2024.

Haddii adiga oo shaqola'aan ah aad shaqeysid, islamarkaana aad qaadato kaalmadii shaqola'aanta ee lagu heshiiyay, qaddarka kaalmadaada lagu siiyo waxaa dhici karta in la dhimo oo ay intii hore ka yaraato 1.4.2024.

Aaladda wax lagu xisaabiyo (laskuri) ayaad ka ogaan kartaa ama ku qiimayn kartaa kaalmada shaqola'aanta, iyo sida uu isbeddelkaan saamaynta ugu leeyahay qaddarka kaalmada shaqola'aanta ee lagu siiyo.

**3 Haddii aad kela-da ka qaadato lacagta kaalmada nolosha ama lacagta ceyrta (toimeentulotuki)**, waxaa dhici karta in qaddarkeedu uu kordho, haddii la dhimo ama la yareeyo qaddarka kaalmadii hoyga ee guud ama kaalmadii shaqola'aanta ee aad heli jirtay.

Qiimayn ku samee qaddarka cusub ee lacagta kaalmada nolosha ama lacagta cayrta, adigoo isticmaalaya aaladda wax lagu xisaabiyo (laskuri), waxaadna codsataa sixitaanka ama hubinta lacagta kaalmada nolosha.

**4 Haddii aadan weli Kela-da ka qaadan wax lacagta kaalmada nolosha ah**, adigoo kaashanaya aaladda wax lagu xisaabiyo ayaad qiimayn ku samayn kartaa, in aad xaq u leedahay qaadashada lacagta kaalmada nolosha iyo inkale.

Waxaad lacagta kaalmada nolosha ama lacagta ceyrta xaq u yeelanaysaa markii, ay dhammaan lacagaha aad isticmaalayso iyo hantida aad haysato ku filnaan waayaan kharashyada ku baxa arrimaha lagammaarmaanka ah ee la xiriira nololmaalmeedka, sida cuntada iyo daawada.



Aaladaha wax lagu xisaabiyo (laskurit) waxaad ka heleysaa cinwaanka [www.kela.fi/laskurit](http://www.kela.fi/laskurit).

Sidoo kale waxaad talo weydiisan kartaa khabiiraddeenna jooga qaybta adeegga.

Hubinta ama sixitaanka lacagta kaalmada waxaad ka codsan kartaa bogga Omakela ee cinwaankiisu yahay: [www.kela.fi/omakela](http://www.kela.fi/omakela). Sidoo kale waxaad sixitaanka ama hubinta ku soo codsan kartaa qaabka foomka warqad ahaanta ee la buuxiyo, ama inaad timaaddo barta adeegga ee aad danahaaga ka dhammaysanayso, ama waxaad soo wici kartaa adeegga telefoonka ee Kela-da.

Celceliska inta ay qaadanayaan wakhtiyada falanqaynta codsiyada, waxaad ka arki karaysaa cinwaanka ah: [www.kela.fi/kasittelyajat](http://www.kela.fi/kasittelyajat).

Halkaan ka akhri faafaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan isbeddelka iyo wararka ku saabsan codsiga: [www.kela.fi/muutokset-tukiin](http://www.kela.fi/muutokset-tukiin)